WASAARADDA QORSHEYNTA MAALGASHIGA &
HORUMARINTA DHAQAALAHA

وزارة التخطيط والاستثمار والتنمية الاقتصادية

MINISTRY OF PLANNING, INVESTMENT AND
ECONOMIC DEVELOPMENT

# WARBIXINTA BILLAHA

## NOFEEMBAR 2025



## HORDHAC

Bishii Nofeembar 2025 waxay ahayd bil horumar weyn ay ku talaabsatay Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha (WQM&HDH), iyadoo xaqiijisay tallaabooyin muhiim ah oo dhanka dib-u-habaynta hay'adaha, xoojinta iskaashiga heer federaal iyo heer dowlad-goboleed, iyo adkeynta wadashaqeynta caalamiga ah si loo dardargeliyo hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029). Waxyaabaha ugu waaweyn waxaa ka mid ahaa ansixinta sharciga dhismaha Hay'adda Maalgashiga Soomaaliya, hirgelinta Siyaasadda Shaqaalaha iyo Nidaamka cusub ee HR/ERP, wadatashiyo ballaaran oo lala yeeshay Dowlad-Goboleedyada si loo dhamaystiro Istaraatiijiyadda Hirgelinta NTP, iyo qabsoomidda Shirweynaha 2-aad ee Kormeerka & Qiimeynta oo lagu daahfuray Manhajka iyo Hagaha Qiimeynta Qaranka. Wasaaraddu sidoo kale waxay ansixisay natiijooyinka Qiimeynta QHQ-9, waxay dardargelisay daadejinta SDG-yada, kana qeyb gashay shirar muhiim ah oo caalami ah oo ka dhacay Doha iyo Brazil. Intaas waxaa dheer, xiriirka bah-wadaagta sida Midowga Yurub, Qaramada Midoobay, UNFPA, Brazil iyo Machadka Qorsheynta Carabka ayaa sii adkeeyay himilada Wasaaradda ee ku dhisan qorsheyn xog-ku-saleysan, awooddhisid hay'adeed, iyo hogaaminta horumarka waara ee Soomaaliya.

# SHIRKA XOOJINTA ISKUDUWIDDA IYO WADASHAQEYNTA HAY'ADAHA FEDERAALKA. DOWLAD-GOBOLEEDKA IYO GOBOLKA BANAADIR




**29-ka Nofeembar 2025 -** Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee DFS ayaa magaalada Muqdisho ku qabatay shir muhiim ah oo lagu xoojinayo isku-duwidda iyo wada-shaqeynta hay'adaha dowladda ee heer federaal, dowlad-goboleed iyo Gobolka Banaadir, si loo dardar-geliyo fulinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka.

Shirka waxaa furay Kusimaha Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Mudane Aadan Qasim Maxamuud, oo ka hadlay muhiimadda uu kulankani u leeyahay dhisidda iskaashi wax-ku-ool ah oo u dhexeeya hay'adaha dowladda, si loo helo hannaan qorsheynta midaysan oo hufan.

Sidoo kale, Agaasimaha Waaxda Qorsheynta, Mudane Maxamed Wali Ahmed, ayaa shirka ka jeediyay warbixin faahfaahsan, isagoo sharaxay ujeeddada kulanka iyo istaraatiijiyadda Wasaaradda ee ku aaddan xoojinta isku-duwidda, mideynta hannanka qorsheynta, iyo dhismaha awoodda hay'adaha dowladda ee ka shaqeeya qorsheynta qaranka.

Shirka oo ay ka soo qeyb galeen agaasimayaal iyo khubaro ka kala socday waaxyaha qorsheynta ee dowladda federaalka ayaa si qoto dheer looga dooday sidii loo hirgelin lahaa hannaanka mideysan ee qorsheynta qaranka, korna u qaadaya hufnaanta, isla-xisaabtanka iyo fulinta mashaariicda horumarineed ee dalka.

Ugu dambeyntii, shirka waxa lagu adkeeyay muhiimadda ay leedahay in la joogteeyo kulamada noocan ah, si loo xoojiyo iskaashiga iyo isku-duwidda hay'adaha dowladda, loogana miro dhaliyo fulinta qorshayaasha horumarineed ee qaranka.

# WASAARADDA QORSHEYNTA OO QABATAY TABABAR KU SAABSAN NIDAAMKA GUUD EE MAAREYNTA ARRIMAHA SHAQAALAHA (KHEYRAADKA AADANAHA



29-ka Nofeembar 2025 - Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ayaa qabatay tababar ku saabsan Nidaamka Maaraynta Shaqaalaha (ERP System), kaas oo qayb ka ah hirgelinta Siyaasadda iyo Habraacyada Shaqaalaha ee dhawaan la ansixiyay. System-kan ayaa Wasaaradda ka caawinaya in si casri ah oo hufan loo maamulo shaqaalaha iyo dhammaan habraacyada shaqo-gudashada.

Agaasimaha Waaxda Shaqada iyo Shaqaalaha, Mudane Cadow Maxamed Aadan, oo si rasmi ah u furay tababarka, ayaa sharaxay muhiimada uu leeyahay nidaamkan cusub, isagoo xusay in uu gacan ka geysan doono hagaajinta hab-maamulka shaqaalaha iyo in Wasaaraddu u shaqeyso si waafaqsan sharciga iyo hannaanka dowladeed.

Machadka IPF (Institute of Public Finance – Somalia), oo diyaariyay nidaamkan, ayaa soo bandhigay qaab-dhismeedka ERP-ga, waxaana uuna bixiyay ku saabsan aga bilaabo qaadashada shaqaalaha cusub, diiwaangelinta xogta, maaraynta shaqada maalinlaha ah, horumarinta xirfadaha, illaa qiimeynta waxqabadka shaqaalaha.

Ugu dambeyntii, Agaasimaha Waaxda Shaqada iyo Shaqaalaha, Mudane Cadow Maxamed Aadan, ayaa soo xiray kulanka, isagoo tilmaamay muhiimadda ay leedahay in Wasaaraddu u guurto nidaam dhijitaal ah oo beddelaya hababka gacanta lagu qabto, si loo xoojiyo hufnaanta, isla xisaabtanka, iyo waafaqsanaanta casriga maamulka dowladda.

# AQALKA SARE OO MEELMARIYAY SHARCIGA DHISIDDA HAY'ADDA MAALGASHIGA SOOMAALIYA



**29-ka Nofeembar 2025 -** Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa meelmariyay Hindise-Sharciyeedka Dhisidda Hay'adda Maalgashiga Soomaaliya, oo ka mid noqon doona Hay'adaha hoos yimaada Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha.

Wasiirka Qorsheynta Qaranka, Mudane Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene), ayaa uga mahadceliyay Guddoonka iyo Mudanayaasha Aqalka Sare ansixinta hindise-sharciyeedkan, isaga oo xusay marxaladihii uu soo maray diyaarintiisu muddadii ku dhoweed labada sano ee la soo dhaafay.

Hindise-sharciyeedkan waxaa horey u ansixiyay Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, waxaana hadda uu sugayaa saxiixa Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud, si uu sharciga dhaqangal u noqdo.

Ansixinta sharcigan waxaa la filayaa in uu wax weyn ka beddelo maalgashiga gudaha iyo soo jiidashada maalgashiga caalamiga ah (Foreign Direct Investment – FDI), isaga oo kor u qaadaya hufnaanta, isku-duwidda iyo jawiga maalgashiga dalka.

## SHIRKA MAALGASHIGA & HORUMARINTA ADEEGYADA BIYAHA




**27-ka Nofeembar 2025** - Agaasimaha Waaxda Maalgashiga ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Maxamed Dubo, ayaa ka qeybgalay shir lagu falanqeynayay maalgashiga iyo horumarinta adeegyada biyaha oo ka dhacay magaalada Nairobi, Kenya. Shirka waxaa soo qabanqaabiyay mashruuca horumarinta kheyraadka biyaha ee ay maamusho Wasaaradda Tamarta iyo Kheyraadka Biyaha.

Agaasime Dubo wuxuu kamid ahaa khubarada ka hadashay sida loo dardargelin karo hirgelinta Qorshaha Qaranka ee Horumarinta Kheyraadka Biyaha, loona abuuri karo maalgelin waarta oo kor u qaadda adeegyada biyaha ee dalka.

Intii dooddu socotay, Agaasimuhu wuxuu si faahfaahsan uga hadlay: Mudnaanta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029) ee la xiriirta horumarinta biyaha, Mashaariicda diyaar u ah maalgelinta, Iyo fursadaha maalgashi iyo iskaashi ee lagu ballaarin karo helitaanka biyo nadiif ah oo waara.

# WASAARADDA QORSHEYNTA OO ANSIXISAY SIYAASADDA IYO HABRAACYADA SHAQAALAHA (KHEYRAADKA AADANAHA



**26-ka Nofeembar 2025 -** Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ayaa qabatay kulan lagu ansixinayay Siyaasadda iyo Habraacyada Shaqaalaha (Kheyraadka Aadanaha). Siyaasaddan ayaa ka caawinaysa Wasaaradda in ay si nidaamsan oo cad u maamusho shaqaalaha iyo howlaha shaqo.

Kulanka waxaa soo qabanqaabisay Waaxda Shaqada iyo Shaqaalaha, waxaana ka qayb galay mas'uuliyiin ka socday Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, Guddiga Shaqaalaha Rayidka iyo hay'ado kale oo dowladeed.

Agaasimaha Guud, Mudane Maxamed Shire, oo si rasmi ah u furay kulanka ayaa sheegay in siyaasaddan cusub ay muhiim u tahay hagaajinta shaqada iyo in Wasaaraddu u shaqeyso si hufan oo waafaqsan shuruucda dalka.

Sidoo kale, Agaasimaha Waaxda Shaqada iyo Shaqaalaha, Mudane Cadow Maxamed Aadan, ayaa sharaxay ujeedada kulanka iyo sida ay siyaasaddani u fududeyn doonto maamulka shaqaalaha.

Machadka IPF (Institute of Public Finance, Somalia), oo diyaarisay siyaasaddan ayaa soo bandhigtay sida loo sameeyay siyaasadda iyo qaybaha ay ka kooban tahay, laga bilaabo qaadashada shaqaalaha cusub ilaa horumarinta xirfadaha iyo qiimeynta waxqabadka.

Ugu dambayn, Agaasimaha Waaxda Shaqada, Mudane Cadow Maxamed Aadan ayaa soo xiray kulanka isagoo sheegay in kulanka xiga lagu soo bandhigi doono nidaam casri ah oo kombiyuutar ku shaqeeya, kaas oo fududeyn doona hawlaha Wasaaradda ee hadda gacanta lagu qabto.

# WASAARADDA QORSHEYNTA IYO HAY'ADDA NCA OO KA WADA HADLAY XOOJINTA ISLA-XISAABTANKA IYO HUFNAANTA BARNAAMIJYADA



**25-ka Nofeembar 2025** - Waaxda Kormeerka iyo Qiimaynta ee Wasaaradda Qorsheynta ayaa kulan miro-dhal ah la qaadatay Hay'adda NCA – Somalia, iyagoo ka wada hadlay xoojinta daah-furnaanta, isla-xisaabtanka iyo waafajinta barnaamijyada NCA ee mudnaanta horumarineed ee qaranka.

Kulanka oo uu gudoomiyay Agaasimaha Waaxda, Mudane Maxamuud Siciid Nuur, kana soo qaybgaleen Agaasimaha Guud ee NCA Soomaaliya, Mudane Ebulu George William, iyo Mudane Abukar Aadan, Maamulaha Barnaamijyada Koonfurta & Bartamaha Soomaaliya ayaa lagu gorfeeyay is-waafajinta hababka M&E-ga, wadaagista xogta iyo sidii loo adkeyn lahaa isku-duwidda iyo hufnaanta barnaamijyada.

Labada dhinac waxay isku raaceen in la dardargeliyo iskaashiga iyo in la qaado tallaabooyin wax-ku-ool ah oo lagu xaqiijinayo barnaamijyo natiijo leh oo bulshada Soomaaliyeed ka faa'iideeystaan, kuna saleysan nidaam kormeer iyo qiimayn mideysan oo heer qaran ah.

## SHIRKA XOOJINTA ISTICMAALKA XOGAHA DHAQAALE




**25-ka Nofeembar 2025 -** Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ayaa qabatay kulan muhiim ah oo lagu xoojinayey isticmaalka xogaha dhaqaale ee lagu hago go'aannada hay'adaha dowladda.

Kulanka, oo ay soo qabanqaabisay Waaxda Horumarinta Dhaqaalaha, ayaa ka dhacay xarunta Wasaaradda, waxaana ka qeybgalay mas'uuliyiin iyo wakiillo ka kala socday hay'adaha dowladda.

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda, Mudane Maxamed Shire, ayaa si rasmi ah u furay kulanka, halka Agaasimaha Waaxda Horumarinta Dhaqaalaha, Dr. Cabdinaasir Cumar Kaatib, uu bixiyay faahfaahin kooban oo ku saabsan ujeedada iyo muhiimadda kulanka.

Intii uu kulanku socday, waxaa si qoto dheer looga dooday sidii loo horumarin lahaa ururinta, maaraynta iyo adeegsiga xogaha dhaqaale, si go'aannada dowladdu ugu dhisnaadaan aqoon, hufnaan iyo xog lagu kalsoonaan karo. Sidoo kale, hawlwadeenada waaxdu waxay soo bandhigeen xogaha hadda la hayo iyo meelaha ay ka jiraan baahiyaha xogeed ee u baahan horumar.

Ka qeybgalayaasha ayaa falanqeeyay doorka ay xogaha dhaqaale ku leeyihiin dejinta siyaasadaha iyo qorshayaasha dowladda, kuwaas oo muhiim u ah in la gaaro go'aanno sax ah oo ka tarjumaya mudnaanta horumarineed ee dalka.

# TABABARKA HORUMARINTA GANACSIGA GAARKA LOO LEEYAHAY IYO MAALGASHIGA SHISHEEYE (FDI)



**25-ka Nofeembar 2025** - Ismaaciil Cabdalla Cali, Madaxa Fududeynta iyo Taageerada Maalgashiga ee Waaxda Maalgashiga ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, ayaa soo dhammaystay tababar heer sare ah oo socday laba toddobaad, kaas oo uu soo qabanqaabiyay Machadka Qorsheynta Carabta (API) ee dalka Kuwait. Tababarku waxa uu diiradda saaray Horumarinta Ganacsiga Gaarka loo leeyahay iyo Maalgashiga Shisheeye (FDI).

Tababarka waxaa qeyb ka ahaa booqashooyin shaqo oo lagu tagay Rugta Ganacsiga iyo Warshadaha Kuwait (KCCI)iyo Hay'adda Kuwait ee Mashaariicda Iskaashiga (KAPP), halkaas oo la isku dhaafsaday khibrado ku saabsan dhiirrigelinta maalgashiga iyo iskaashiga Dowladda iyo Ganacsiga Gaarka loo leeyahay.

Ka-qaybgalkaani wuxuu muujinayaa dadaalka Wasaaradda Qorsheynta ee dhanka dhisidda aqoonta shaqaalaha, xoojinta iskaashiga caalamiga ah, iyo horumarinta jawi maalgashi oo tartan leh oo Soomaaliya ka hanaqaada.

## TABABARKA DHISIDDA AWOODDA HAWLWADEENADA WAAXDA QORSHEYNTA



**23-ka Nofeembar 2025 -** Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ayaa qabatay tababar ku saabsan Dhisidda Awoodda Hawlwadeenada Waaxda Qorsheynta ee Diyaarinta Istiraatiijiyadaha iyo Siyaasadaha, kaas oo ka dhacay xarunta Wasaaradda.

Tababarka waxaa si rasmi ah u furay Agaasimaha Guud ee Wasaaradda, Mudane Maxamed Shire, waxaana ka soo qeybgalay hawlwadeenada iyo xubnaha kala duwan ee Waaxda Qorsheynta Qaranka. Ujeeddada guud ee tababarku waa in la xoojiyo xirfadaha shaqaalaha si kor loogu qaado aqoonta ay u leeyihiin diyaarinta istiraatiijiyado wax-ku-ool ah iyo siyaasado hufan oo taageera Qorshaha Isbeddelka Qaranka.

Casharka koowaad ee tababarka ayaa diiradda lagu saaray sida loo diyaariyo Siyaasadaha, iyadoo ka-qaybgalayaashu ay heleen faham aasaasi ah oo ku saabsan sida siyaasadaha dowladda loo qorsheeyo, loo dejiyo, loona qiimeeyo.

Intaas ka dib, waxaa la gudagalay casharka labaad oo ku saabsanaa Aasaaska Dejinta Istaraatiijiyadda, kaas oo lagu soo bandhigay farsamooyinka muhiimka ah ee loo adeegsado habaynta istaraatiijiyado wax-ku-ool ah, kuwaas oo la jaanqaada mudnaanta qaranka iyo qorshayaasha horumarineed.

Maalinta koowaad ee tababarka ayaa waxaa soo xiray Agaasimaha Waaxda Qorsheynta, Mudane Maxamed Wali Cabdi, isagoo bogaadiyey ka-qaybgalayaasha iyo muhiimadda ay tababarkani u leeyahay kor u qaadista tayada shaqada qorsheynta ee Wasaaradda.

# ANSIXINTA WARBIXINTA QIIMEYNTA MUDDO-DHAMMAADKA QORSHAHA 9-AAD EE HORUMARINTA QARANKA (2020–2024)



**22 Nofembar 2025** - Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha (WQM&HDH) ayaa xarunta Wasaaradda ku qabatay shir lagu ansixinayey natiijooyinka Qiimeynta Muddo-Dhammaadka Qorshaha 9-aad ee Horumarinta Qaranka (2020–2024). Shirka, oo ay soo agaasintay Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta, waxa ka soo qeybgalay hay'adaha Dowladda Federaalka, Ururka Qiimeynta Soomaaliya, bulshada rayidka iyo khubaro farsamo.

Ujeeddada shirka ayaa ahayd in dib loo eego natiijooyinka qiimeynta QHQ-9, la xaqiijiyo oggolaanshaha daneeyayaasha, lana helo talooyin hagaya qorshe-dejinta xigta, gaar ahaan Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029) oo haatan lagu jiro fulintiisa.

Shirka waxaa furay Agaasimaha Guud ee Wasaaradda, Mudane Maxamed Shire, waxaana xigay soo bandhigista natiijooyinka qiimeynta QHQ-9 oo dulmar ka bixisay waxqabadka tiirarka siyaasadda, amniga, dhaqaalaha, adeegyada bulshada, iyo caqabadaha taagnaa muddadii hirgelinta.

Ka qeybgalayaashu waxay yeesheen dood furan iyo su'aalo ku saabsan natiijooyinka iyo habraaca qiimeynta. Intaa kaddib, waxaa loo kala qeybiyey afar kooxood oo ka dooday tiirarka Qorshaha Horumarinta Qaranka: Siyaasadda loo dhan yahay, Amniga & Sareynta Sharciga, Horumarinta Dhaqaalaha, iyo Horumarinta Bulshada. Koox kastaa waxay ansixisay natiijooyinka la soo bandhigay, iyagoo soo jeediyey talooyin lagu xoojinayo qorsheynta iyo hirgelinta mustaqbalka.

Natiijooyinka la ansixiyey waxay kaalin muhiim ah ka qaadan doonaan hagaajinta qorsheynta qaranka, dardargelinta fulinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029), iyo xoojinta go'aan-qaadashada ku saleysan xog dhab ah.

## WADATSHIGA ISTARAATIIJIYADDA HIRGELINTA QORSHAHA ISBEDDELKA QARANKA EE HEER FEDERAAL



**20-ka Nofeembar 2025** - Wasaaradda Qorsheynta Qaranka ayaa Muqdisho ku qabatay kulan-wadatashi heer sare oo lagu falanqeeyay mudnaanta qaranka iyo talooyin lagu diyaarinayo Istaraatiijiyadda Hirgelinta NTP 2025–2029. Kulanka oo ay ka qeyb galeen Wasaarado federaal ah, khubaro iyo hoggaamiyeyaasha tiirarka NTP-ga ayaa diiradda lagu saaray qeexidda mudnaanta federaalka, habraacyada hirgelinta, iyo nidaamyada isla-xisaabtanka.

Agaasimaha Guud, Maxamed Shire, oo shirka furay, ayaa tilmaamay muhiimadda hab ku saleysan xog iyo iskaashi dowladda oo dhan ah. Ka-qaybgalayaashu waxay doodahooda ku falanqeeyeen afarta tiir ee NTP-ga, iyagoo adkeeyay baahida loo qabo xoojinta wada-shaqeynta federaalka iyo dowlad-goboleedyada, kormeerka & qiimeynta, iyo maalgelinta.

Kulanka ayaa ku soo dhammaaday is-afgarad ku saabsan tallaabooyinka xiga, oo ay ku jiraan dhammaystirka Istaraatiijiyadda Hirgelinta iyo diyaarinta khariidadda fulinta. Agaasimaha Guud ayaa xaqiijiyay sida ay Wasaaraddu uga go'an tahay dardargelinta hirgelinta NTP 2025–2029.

## SHIR KU SAABSANAA ARRIMAHA DEEGAANKA IYO U-ADKEYSIGA CIMMILADA



**20-ka Nofeembar 2025** - Mudane Cabdiraxiim Xuseen (Husu), oo ah isku-duwaha Tiirka Deegaanka iyo Adkeysiga Cimilada ee Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP2025_2029), ayaa ka qeybgalay shir ku saabsanaa Arrimaha Deegaanka iyo U-adkeysiga Cimmilada oo qeyb ka ahaa shirka Isbeddelka Cimmilada ee Sanadkan ka socda Dalka Brazil.

Kulanka waxaa lagu lafa-guray ajandaha deegaanka iyo cimilada ee NTP-ga, iyadoo xoogga la saarayo adkeynta adkaysiga qaranka iyo sida Soomaaliya ula jaanqaadi karto ballan-qaadyada caalamiga ah ee cimilada.

## KULANKA DANJIRE FRANCESCA DI MAURO, SAFIIRKA MIDOWGA YURUB (MY) EE SOOMAALIYA



**19-ka Nofeembar 2025 -** Wasiirka Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha (QM&HDH), Mudane Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene), ayaa kulan miro-dhal ah la yeeshay Danjire Francesca Di Mauro, Safiirka Midowga Yurub (MY) ee Soomaaliya.

Kulanka waxaa lagu lafa-guray xoojinta iskaashiga u dhexeeya Wasaaradda iyo Midowga Yurub, gaar ahaan: hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029) iyadoo lagu dhiirrigelinayo ganacsiga gaarka loo leeyahay; barnaamijka wadajirka ah ee QM&HDH–MY ee dhismaha karaanka aadanaha; doorka Midowga Yurub ee taageerada Soomaaliya xilli ay hoos u dhacday deeqaha horumarineed; iyo diyaar-garowga Madasha Horumarinta Iskaashiga (DCF) iyo Madasha Ganacsiga Soomaaliya–Midowga Yurub.

Labada dhinac waxay isku raaceen in la dardargeliyo iskaashiga lana xoojiyo wada-shaqaynta lagu gaari karo himilooyinka horumarineed ee labada dhinac.

## SHIRWEYNAHA QARAN EE KORMEERKA IYO QIIMEYNTA



**18-ka Nofeembar 2025 -** Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ayaa qabatay Shirweynaha Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta, oo sanadkii labaad oo xiriir ah lagu qabanayo magaalada Muqdisho.

Ra'iisul Wasaare Ku-xigeenka Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Saalax Axmed Jaamac, ayaa si rasmi ah u furay shirweynaha. Munaasabadda waxaa ka soo qayb galay mas'uuliyiin iyo marti-sharaf kala duwan oo ka kala socday Dowladda Federaalka iyo Dowlad-Goboleedyada, Saaxiibada Horumarinta, Qaramada Midoobay, Ganacsatada, Bulshada Rayidka, Jaamacadaha, hay'adaha caalamiga ah iyo kuwa maxalliga ah, iyo khubaro ku takhasustay kormeerka iyo qiimeynta.

Wasiirka Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene), ayaa soo jeediyay khudbad uu kaga hadlay ujeedada shirweynaha iyo natiijooyinka laga filan karo. Wasiirku waxa uu xusay in shirkan uu muhiim u yahay xoojinta nidaamyada qiimeynta dalka si loo dedejiyo fulinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029) oo horaantii sanadkan la daahfuray.

Intii uu shirweynaha socday, waxaa si rasmi ah loo daahfuray Manhajka Qiimeynta Qaranka iyo Hagaha Qiimeynta Qaranka, oo ay diyaarisay Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee Wasaaradda Qorsheynta.

Qaybtii dambe ee shirweynaha waxaa lagu soo bandhigay warbixinno muhiim ah oo lagu falanqeeyay heerka nidaamyada qiimeynta dalka iyo sida loo horumarin karo.

Ugu dambeyn, Wasiir ku-xigeenka Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Maxamed Aadan Maxamed ayaa soo xiray shirweynaha. Waxa uu uga mahadceliyay ka qaybgalayaasha, marti-sharafta, iyo qabanqaabiyeyaasha, isagoo si gaar ah u xusay doorka Agaasimaha Guud ee Wasaaradda, Mudane Maxamed Shire, iyo Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta oo uu hoggaamiyo Mudane Maxamuud Siciid Nuur, kuwaas oo juhdi badan geliyay qabsoomidda shirweynaha.

## DAAHFURKA ISTIRAATIIJIYADDA FULLINTA QORSHAHA ISBEDDELKA QARANA EE GOBOLKA BANAADIR




**17-ka Nofeembar 2025 -** Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha (WQM&HDH), iyadoo kaashaneysa Maamulka Gobolka Banaadir, ayaa magaalada Muqdisho ka daahfurtay shir-wadatashi hal maalin ah oo ku saabsan Istaraatiijiyadda Hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaran (NTP 2025–2029). Kulankan ayaa lagu lafaguray talooyin iyo aragtiyo ku saabsan sida loo mideyn lahaa dadaallada hirgelinta, iyadoo wadatashi lala yeelanayo hay'adaha iyo dhinacyada kala duwan ee Gobolka Banaadir.

Shirka waxaa si rasmi ah u furay Agaasimaha Waaxda Qorsheynta ee Maamulka Gobolka Banaadir, Mudane Cabdulqaadir Dalxa, oo soo dhaweeyay ka-qaybgalayaasha, kana hadlay muhiimadda uu shirkan u leeyahay xoojinta hirgelinta Istaraatiijiyadda Fulinta (Execution Strategy) ee Qorshaha Isbeddelka Qaran, si loo gaaro horumar waara iyo koboc dhaqaale oo la taaban karo.

Intii uu socday kulanka, waxaa si gaar ah diiradda loo saaray sida Qorshaha Isbeddelka Qaran loo waafajin karo duruufaha, baahiyaha, iyo mudnaanta Gobolka Banaadir.

Ugu dambeyn, ka-qaybgalayaashu waxay muujiyeen yididiilo iyo rabitaan xooggan oo ku aaddan in la helo hirgelin wax ku ool ah, si Qorshaha Isbeddelka Qaran uu natiijo muuqata uga keeno Gobolka Banaadir.

## DAAHFURKA ISTIRAATIIJIYADDA FULLINTA QORSHAHA ISBEDDELKA QARANA EE HIRSHABELLE




**13-ka Nofeembar 2025 -** Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga & Horumarinta Dhaqaalaha (WQM&HDH), iyadoo kaashanaysa Wasaaradda Qorsheynta Hirshabelle ayaa magaalada Jowhar ka daahfurtay wada-tashi saddex maalmood ah oo ku saabsan Istaraatiijiyadda Hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaran (NTP 2025–2029).

Wada-tashiga, oo uu furay Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta Hirshabelle, Mudane Cabdullaahi Maxamed, ayaa ujeeddadiisu waxay ahayd ansixinta mudnaanta Hirshabelle ee tiir kasta iyo dejinta istaraatiijiyad wax-ku-ool ah si loo xaqiijiyo iswaafajinta qaab-dhismeedka horumarinta qaranka iyo dowlad-goboleedka.

Ka-qaybgalayaashu oo ka kooban wasaaradaha Hirshabelle, bulshada rayidka, iyo ganacsatada ayaa soo jeediyay tallaabooyin wax-ku-ool ah iyo qaab-dhismeed cad oo hirgelin ah (doorka, jadwalka, iyo tilmaamayaasha la cabbiri karo), iyagoo muujiyey sida ay uga go'an tahay lahaanshaha iyo wadashaqeynta u dhexeeysa wasaaradaha Hirshabelle iyo hay'adaha federaalka.

## KULANKA KU-XIGEENKA WAKIILKA GAARKA AH EE QARAMADA MIDOOBAY EE SOOMAALIYA



**12-ka Nofeembar 2025 -** Wasiirka Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene), ayaa la kulmay Ku-xigeenka Wakiilka Gaarka ah ee Qaramada Midoobay ee Soomaaliya, ahna Iskuduwaha Arrimaha Horumarinta iyo Bani'aadamnimadda, Mudane George Conway, si ay u xoojiyaan iskaashiga u dhexeeya dowladda iyo Qaramada Midoobay ee taageeraya Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025-2029) iyo Qaab-dhismeedka Iskaashiga Qaramada Midoobay (UNCF).

Kulanku wuxuu diiradda saaray Qaab-dhismeedka Iskaashiga Qaramada Midoobay oo hadda la diyaarinayo, iyo sida ay muhiim u tahay inuu la jaanqaado Qorshaha Isbeddelka Qaranka kahor inta aan la ansixin.

Sidoo kale, waxaa la isku afgartay in si heer sare ah looga wada shaqeeyo diyaar-garowga loogu jiro Madasha Isku-duwidda Horumarinta (DCF) ee dhawaan la qaban doono, iyo in la daba-galo go'aannadii dhawaan kasoo baxay kulanka guddiga maamula Sanduuqa Wadajirka ee Soomaaliya.

Labada dhinac waxay isku raaceen in la xoojiyo iskaashiga shaqo ee ka dhexeeya Qaramada Midoobay iyo Wasaaradda si loo gaaro natiijooyin wax ku ool ah.

## KULANKA WAKIILKA UNFPA EE SOOMAALIYA, DR. MARY OTIENO




**12-kaNofeembar 2025** – Wasiirka Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene), ayaa kulan miro-dhal ah la yeeshay Wakiilka UNFPA ee Soomaaliya, Dr. Mary Otieno.

Labada dhinac waxay isla qaateen in la xoojiyo iskaashiga si waafaqsan Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029) iyo Barnaamijka Dalka ee UNFPA (CPD).

Kulanku wuxuu diiradda saaray adkaynta wada-shaqaynta hay'adaha dowladda, deeq-bixiyeyaasha iyo UNFPA si loo sii amba-qaado horumarka caafimaadka taranka, dhiirigelinta haweenka, iyo ilaalinta xuquuqda iyo badqabka dhallinyarada.

Wasiir Beenebeene ayaa xaqiijiyay in Wasaaraddu diyaar u tahay la shaqaynta dhammaan bah-wadaagta si loo hirgeliyo barnaamijyo wax-ku-ool ah guud ahaan dalka.

## DAADEJINTA HIMILOOYINKA HORUMARKA WAARA (SDGS)



**10-ka Nofeembar 2025 –** Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha (WQM&HDH) waxay Muqdisho ku qabatay shir lagu daadejinayo Himilooyinka Horumarka Waara (SDGs), si loogu beddelo mudnaan cad oo heer gobol iyo heer degmo, waafaqsanna Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029).

Kulanka oo ay soo qabanqaabisay Waaxda Qorsheynta waxaa kasoo qaybgalay wasaarado iyo hay'ado ka tirsan Dowladda Federaalka Soomaaliya iyadoo laga dooday sidii SDGs loogu tarjumi lahaa adeegyada bulshada, abuurista fursado shaqo, iyo u-adkaysiga isbeddelka cimilada, si loola jaan-qaado 4ta tiir ee NTP oo kala ah maamul-wanaagga, horumar dhaqaale oo waara, arrimaha bulshada iyo karaanka aadanaha iyo deegaanka iyo u-adkeysiga cimmilada.

Kulanka waxaa furay Agaasimaha Guud, Mudane Maxamed Shire, oo adkeeyay muhiimadda isku xirka himilooyinka caalamiga ah iyo qorshayaasha dalka si ay u noqdaan waxqabadyo la taaban karo.

Natiijooyinka shirka kasoo baxay waxaa ka mid ah diyaarin liis mudnaanta degmooyinka, shax fulin kooban (waqtiyo iyo lammaane-fuliye), hagayaal ku saabsan daadejinta SDGs, iyo isku-xirid natiijooyinka nidaamyada qaran ee kormeerka iyo qiimeynta.

Wasaaraddu waxay ururin doontaa talooyinka ka soo baxay kulanka, waxayna si wadajir ah ula wadaagi doontaa daneeyayaasha si loo bilaabo hirgelin deg-deg ah ee mudnaanta la go'aamiyay.

## KULANKA WASIIRKA HORUMARINTA BULSHADA & LA-DAGAALLANKA GAAJADA EE BRAZIL



**5-ta Nofeembar 2025** - Wasiirka Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene), ayaa kulan miro-dhal ah la qaatay Wasiirka Horumarinta Bulshada & La-Dagaallanka Gaajada ee Brazil, Mudane Wellington Dias, intii lagu guda jiray Shirweynaha 2-aad ee Horumarinta Bulshada ee ka socda Dooxa.

Labada dhinac waxay ka wada hadleen dardargelinta dhimista saboolnimada, xoojinta nidaamka ilaalinta bulshada, iyo ballaarinta fursadaha haweenka, dhallinyarada iyo bulshooyinka barakaca, iyadoo la raacayo yoolalka Qorshaha Isbeddelka Qaran (NTP 2025–2029).

Sidoo kale, waxay isla qaateen in la xoojiyo is-weydaarsiga aqoonta, maalgashiga iyo iskaashiga ganacsiga gaarka loo leeyahay si siyaasadaha loogu beddelo natiijooyin la cabbiri karo iyo shaqooyin waxtar leh.

## SHIRWEYNAHA 2-AAD EE HORUMARINTA BULSHADA EE KA SOCDA DOOXA, QATAR




**4-ta Nofeembar 2025** - Wasiirka Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Dowladda Federaalka Soomaaliya, Mudane Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene), ayaa ka mid ah wafdiga Dowladda Federaalka ee ka qaybgalaya Shirweynaha 2-aad ee Horumarinta Bulshada ee ka socda Dooxa, Qatar, iyo kulanka koowaad ee Hoggaamiyeyaasha Isbahaysiga Caalamiga ah ee Ka-hortagga Gaajada & Saboolnimada. Wafdiga waxaa hoggaaminaya Ra'iisul Wasaare Ku-Xigeenka JFS, Mudane Saalax Axmed Jaamac.

Farriinta Dowladda Soomaaliya waxay xoogga saaraysaa in maalgelin kasta la waafajiyo Qorshaha Isbeddelka Qaran (NTP 2025–2029), si loo xoojiyo nidaamyada qaranka, loo abuuro shaqooyin iyo adkaysi bulsho, loo horumariyo adeegyada dijitaalka ah, isla markaana loo ballaariyo fursadaha dhallinyarada iyo haweenka. Inta shirku socdo, Wasiir Beenebeene wuxuu kulammo la yeelan doonaa hoggaamiyeyaasha iyo saaxiibada horumarinta ee ka soo qaybgalay shirweynaha, si loo dardargeliyo yareynta saboolnimada iyo horumar waara.

Soomaaliya waxay raadinaysaa iskaashi iyo maalgelin dabacsan oo muddo-dheer, xoojinta isku xirka gargaarka bani'aadannimo iyo barnaamijyada horumarinta, iyo adeegsiga tignoolajiyada iyo xogta si loo kordhiyo wax-ku-oolnimada barnaamijyada bulshada ee dalka oo dhan.

## DAAHFURKA ISTIRAATIIJIYADDA FULLINTA QORSHAHA ISBEDDELKA QARANA EE GALMUDUG



**4-ta Nofeembar 2025 -** Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga & Horumarinta Dhaqaalaha (WQM&HDH), iyadoo kaashanaysa Wasaaradda Qorsheynta Galmudug ayaa magaalada Dhuusamareeb ka daahfurtay wada-tashi afar maalmood ah oo ku saabsan Istaraatiijiyadda Hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaran (NTP 2025–2029).

Wada-tashiga, oo uu furay Wasiir-ku-xigeenka Qorsheynta Galmudug, Mudane Maxamed Cabdullaahi Dhegacadde ayaa ujeeddadiisu tahay ansixinta mudnaanta Galmudug ee tiir kasta iyo dejinta istaraatiijiyad wax-ku-ool ah si loo xaqiijiyo iswaafajinta qaab-dhismeedka horumarinta qaranka iyo dowlad-goboleedka.

Ka-qaybgalayaashu oo ka kooban wasaaradaha Galmudug, bulshada rayidka, iyo ganacsatada ayaa soo jeediyay tallaabooyin wax-ku-ool ah iyo qaab-dhismeed cad oo hirgelin (doorka, jadwalka, iyo tilmaamayaasha la cabbiri karo), iyagoo muujiyey sida ay uga go'an tahay lahaanshaha iyo wadashaqeynta u dhexeeysa wasaaradaha Galmudug iyo hay'adaha federaalka.

Wada-tashiyo la mid ah ayaa lagu qaban doonaa dhammaan dowlad-goboleedyada kale.


WASAARADDA QORSHEYNTA
وزارة التخطيط
MINISTRY OF PLANNING



MoPIED